



‘Hawlgallo lagu khaarijiyay saraakiil u shaqaynayay C.I.A’

17 Rajab 1444H (07 Febraayo 2023) – Iyadoo laga duulayo amarka Allaah ee ah in lala dagaalamo cadawgiisa, lana difaaco Diinta Islaamka, ciidamada Mujaahidiintu waxay caawa oo Arbaca ah hawlgallo qorshaysan ka fuliyeen Wilaayada Banaadir kuwaas oo lagu khaarijiyay labo sarkaal oo muhiim u ahaa kooxda ridada ah ee Soomaaliya iyo hay'adda sirdoonka Maraykanka ee loo yaqaano C.I.A.

Hawlgallada lagu beegsaday saraakiisha la shaqaynaysay C.I.A oo ka kala dhacay degmooyinka Hodan iyo Dharkenley ayaa waxaa lagu dilay Murtadiinta kala ah Isaaq Maxamad Xassan (Sandheere) iyo Mahad Afdheere Dalabey, kuwaas oo ahaa saraakiil ka tirsan kooxda ridada ah, si gaar ahna ula shaqeynayay sirdoonka Maraykanka. Isaaq Sandheere, wuxuu hore usoo noqday wasiir ku xigeenka waxa loogu yeero wasaarada amniga Jubaland, sidoo kalena wuxuu soo noqday wasiir dowlaha waxa loogu yeero wasaarada amniga Jubaland, wuxuuna sidoo kale ahaa xildhibaan ka tirsan baarlamaanka dawaaciida ah ee maamulka Kismaayo.

Murtad Sandheere wuxuu kaloo ahaa sarkaalka ugu muhiimsan ee ka shaqeeya qorista iyo shaqaalaysiinta jawaasiista murtadiinta ah ee u basaasa Maraykanka, gaar ahaan Wilaayada Islaamiga ah ee Jubooyinka. Murtad Sandheere ayaa shaqaalaysiiyay tobanaan jawaasiis ah, kuwaas intooda badan ay gacanta kusoo dhigeen ciidamada Mujaahidiinta iyagoo ku gudajira hagardaamadii loo soo xilsaaray, waxaana dadka Muslimiinta ah ee ku baxay gacanta murtadkaan iyo jawaasiista uu shaqaalaysiiyay ka mid ahaa Sheekh Cabduqaadir Kumaandoos oo ay diyaaradaha saliibiyiinta Maraykanku ku duqeyeen degmada Saakoow ee Wilaayada Jubooyinka.

Hawlgalka labaad ee ay caawa fiidkii Mujaahidiintu ka fuliyeen Magaalada Muqdisho, gaar ahaan degmada Hodan, waxaa lagu khaarijiyay sarkaal murtad ah oo lagu magacaado Mahad Afdheere Dalabey, kaas oo si gaar ah uga tirsanaa waxa loogu yeero hay'adaha dambi-baarista ridada, ahaana jaasuus u shaqeeya sirdoonka saliibiyiinta Maraykanka, lana wadaagay xogaha dadka Muslimiinta ah.

Murtadiinta kala ah Isaaq Sandheere iyo Mahad Afdheere ayaa in muddo ah waxaa ku raad-joogay ciidamada Mujaahidiinta si looga abaal-mariyo gaalnimada ay ku dhecean iyo dhibaatada ay u geysteen shacabka Muslimiinta ah ee Soomalaiyed, waxaana hawgallada caawa ka dhacay Muqdisho ee lagu khaarijiyay murtadiintaas u shaqaynaysay sirdoonada ridada iyo saliibiyiinta Maraykanka ay muujinayaan in saraakiisha ridada iyo mujrimiinta ashahaado la dirirka ah aysan marnaba ka baxasan karin ciqaabta Allaah, isla markaana gacanta dheer ee Mujaahidiintu, mar ay ahaataba, ay soo qaban doonto Insha-Allaah.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay u dagaallameysa dhawritaanka badqabka Ummadda Muslimka ah, hirgelinta Shareecada Islaamka iyo inay dhamaan dhulalka Muslimiinta ah ka xoreyso gaalada iyo murtadiinta dabadhilifka u ah. Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay mar kale ku celinaysaa dalabkii ahaa in dadka Muslimiinta ah ay ka dheeraadaan saldhigyada, xarumaha iyo xafiisyada cadawgu ku leeyihiin degmooyinka iyo deegaanada ay xoogga uga haystaan ummada Soomaaliyeed ee Muslimka ah.

Waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ballan ku qaaddeysaa inay sii wadi doonto Jihaadka ka dhanka ah isbahaysiga caalamiga ah ee saliibiyiinta iyo dabadhilifyadooda murtadiinta ah ilaa ay geyiga Soomaaliyeed ka saareyso cadowga hororka ah ee ku soo duuley, iyo illaa diinta dhamaanteed ay Allaah keliya u sugnaaneyso. Allaah, subxaanahu watacaalaa, wuxuu yiri:

وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّىٰ لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ الدِّينُ لِلَّهِ فَإِنِ اتَّهَوْا فَلَا عُذْوَانَ إِلَّا عَلَى الظَّالِمِينَ [البقرة: 193]



﴿ وَلِلَّهِ الْعَزَّةُ وَرَسُولُهُ وَالْمُؤْمِنُونَ وَلَكِنَّ الْمُنَفِّقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾